



# Ku soo dhowaada Umeå – Caasimadda dhaqanka ee Yurub 2014

**Maalinta furitaanka *Future Flows Through Us* waxay Umeå soo bandhigeysaa waxa dhici doonaa inta uu socda sannadka caasimadda dhaqanka. Waxaa la qabanqaabi doonaa boqolaal xaflado, riwaayado, heeso, buugag, filimo, muusiig, farshaxan, farsamo-gacmeed, isborrti iyo waxyaalo kaloo badan.**

Golaha Midowga Yurub ayaa Umeå u magacaabay caasimadda dhaqanka Yurub ee 2014. Ujeeddada Midowga Yurub ka leeyahay caasimadaha dhaqanka waxa weeye ka turjumidda tayada dhaqamada, kordhinta dhaqan-isweydaarsiga iyo kiciyo xiisaha hodanimada dhaqamada Yurub. Magaaladii ugu horreysey oo noqota caasimadda dhaqanka sannadkii 1985 waxay ahayd Aten oo caasimadda Giriigga. Hadda laba magaalada sannad walba la doortaa. Sannadkaan 2014 waxaa wehelisa magaalada Riga ee Letland.

Waxaa Umeå loo doortay in ay tahay magaalada dooneysa in ay Yurub ka dhexmuuqato iyo in ay dhaqanka loo isticmaalo awood lagu horumariyo gobolka ay ka tirsan tahay. Waxaa ahmiyadda la ssinayaa Umeå laakiin degmooyin kale oo gobolka ka mid ah ayaa qayb ka ah.

## **Magaaladii dhirta björk**

Umeå waxay ku taal gobolka Västerbotten ee waqooyiga Iswiidhen, waxaana ku nool qiyaastii 118000 oo qof. Magaaladu waxay meelo badan oo lagu tamaashleeyo, waana magaalada mar walba u dhow dabecadda. Umeå iyo agagaarkeeda waxaa laga xeebo, harooyin, dhul kaymo ah iyo dhul lahu ordo, iyo waqtiga qaboobaha meelo ulaha barafka lagu ordo. Dadka Umeå waxay aad u isticmaalaan bushkuleetiga maadaama aysan kala fogeyn oo waddooyin bushkuleeti badan tahay.

Dab ayaa Umeå badankeed burburiyey sannadkii 1888. Markii magaalada dib loo dhisay ayaa lagu beeray dhirta björk waddooyinka hareerahooda si looga hortago in dabku faafo. Sidaas awgeed ayaa Umeå loogu magacaabaa magaaladii björk.

## **Nolol-dhaqameedka hodan ah**

Jaamcadda Umeå waxay ka mid tahay jaamacadaha Iswiidhen ugu da'da weyn, waxaana ku sugan arday, macallimiin iyo khubaro ka kala timid dunida oo

dhan. Ardayda badanina waxay Umeå ka dhigtay mid dadkeedu da' yar yahay. Waxaa webiga Ume ku ay yaal aqalka farshaxanka oo lagu barto naqshadaha, farshaxanada iyo cilmiga dhismaha. Waxaa kaloo halkaa ku yaal matxafka sawirada oo ah wax ugu muhiimsan farshaxanka casriga ah.

Umeå waxay kodan ka tahay hiddaha iyo dhaqanka sida masraxa, matxafyada, faagarayaasha muusigga – tusaaale tiyaatarka Norrland. Waxaa sannad walba lagu soo bandhigaa xaflado dhaqan oo caalami oo ay ururo-dhaqameed badani qayb firfircoon ka qaataan. Waxaa halkaa jooga kooxo fannaaniin ah oo badankood ay dunida caan ka noqdeen.

## **Iskaashi wax soosaar**

Barnaamijka sannad-dhaqameedka Umeå waxaa loo qaybiyey siddeedda xilli ee sannadka saamigu u qaybsamo. Dadka saamigu waa dadka keli ah oo ku nool EU. Umeå waxay ku taal dhulka saamiga, Sameland.

Iskaashiga wax soosaarku wuxuu qayb muhiim ah ka yahay hawlaha caasimad-dhaqameedka Umeå. Cid walba oo dooneysa in ka qaybqaadato barnaamijka oo wax ku biiriso. Hawlaha 2014 waxaa qabanqaabinaya ururo, machadyo dhaqan iyo dad kale oo taageero ka helaya Umeå2014. Waxaa la xaqiijin doonaa in qaybo badan oo mashruuca caasimad-dhaqameedka ay sii socon doonaan 2014 kadib.

Hawlaha caasimad-dhaqameedku waxay qayb ka yihiin horumarka waqti dheer ee Umeå – dhaqan ahaan iyo bulsho ahaanba – si loo abuuro goobo cusub oo lagu kulmo iyo wadashaqayn iyo fursado caalami ah.

**Bogga [www.umea2014.se](http://www.umea2014.se) waxaa ka heleysaa barnaamijka sannad-dhaqameedka magaalada oo ku qoran iswiidhish iyo ingiriis.**